

IIB MAGALE

FAAFINTA



RASMIGA

الرسمية

إِلْجَرِيدَةُ

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 11aad Muqdisho 1 Feb. 1983 L. 2

FAAFINTAAN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Raamiga ah ee Madaxtooyada J. D. S. QIRMAADU Waa 5 Shan lambar walba—RUKUNKA: Sannadii waa Sh. So. 100 Somaliya gudaheda—dibaddeedan waa Sh. So. 300 Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wu xuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qlimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa 2 laba Ih. Rukunka & qorista aka waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasini ga ah—incagta wakaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Locagta.

KOOBMIN

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 2 ee 15

Jen. 1983 Magacaabid madax loo wakiishay

Kharajka Miisaaniyadda Xisbiga H.K.S. ee

Sannadka 1983 BOG. 82

XEER WASAARADDA GA/KA BADDA &

DEKADAHA Lamb. 1 ee 1 Jen. 1983,

Keernidaamiinta Tariifada Dekedaha » 83

Wakaaladda M. Qaranka

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 2 ee 15 Jen. 1983,
Magacaabid madax loo wakiishay Miisaaniyadda
Xisbiga X.K.S. ee Sannadkan 1983;

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqr
aadiga ee Soomaaliya

ISAGOO ARKAY: Dekreetada Sharciga ee soo baxday
29kii December 1961, Lr. 2, Amarka Maamulka Xis
aabaaadka;

ISAGOO ARKAY: P.D.R. 20Maarso 1965, Lr. 13 Xeer
Nadaaminta iyo Abaabolidda Guddiga Wasaaradda
iyo Xafiisyada la xiriira.

MARKII LA GAREYSTAY: In Loo baahan yahay in
Loo Wakiisho Nin mas'uula Maamlka Miisaaniyad
da Xisbiga ee Sanadka 1983, Si Loo Socodiyo Ho
wlaha Xisbiga;

D E K R E E T A

Jaalle Sarreeye Guuto Maxamed Sheekh Cusmaan,
Guddoomiyaha Hoggaanka Maaliyadda ee X.H.K.S. wa
xaa loo wakiishay maamulka miisaaniyadda Sa
nadka 1983 ee Xisbiga H. K. S. laga bilaabo 1da
Jannaayo 1983.

Dekreetadan waxay dhaqan galeysaa haddadatan
Waxaana Lagu Soo Saarayaa Faafinta Rasmiga ah

Muqdisho, 15. 1. 1983.

(S/GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE)

MADAXWEYNAHA J. D. S.

Waan aragnay ee Diiwaan gelinay.
Diiwaanka L. 1 bog L.8.

Muqdisho, 29 Jen, 1983.

Hantidhowraha Guud.

Dr. Yussof Cabdulla Gaas

XEER WASAARADDA G. BADDA IYO DEKEDAH

L. 1 ee 1 Jen. 1983, Xeernidaaminta Tariifada Dekedaha 1983ka.

MARKUU ARKAY: Dastuurka Jahmuuriyadda Dimoqraadiga Soomaailya.

MARKUU ARKAY: Sharciga L/r 1aad soo baxay 21kii Oktoobbar. 1969.

MARKUU ARKAS: Sharciga L/r 1aad ee soo baxay 7dii Jennaayo, 1973kii ee lagu dhisay wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed. qobkiisa 3aad, baaraaga rafka 3aad, Xarafka (a) .

MARKUU ARKAY: Sharciga L r. 17aad ee soo baxay 21kii April, 1974kii kuna saabsan awoodda Wasiirad du ku leeyihin Wakaaladaha raacaan.

MARKUU ARKAY: Talada Guddoomiyaha Wakaalad da Dekedaha Soomaaliyeed.

MARKUU TIX/Y : Baahida loo qabo Xeernidaamin lagu dhaqan geliyo tariifada hawlahaa Dekedaha Dal ka.

WUXUU SOO SAARAY

XEERNIDAAMINTA IYO TARIIFADA LA SOCOTA

QODOBKA 1 UJEEDDADA TARIIFADA

Wasiirku Wuxuu Aqoonsaday Baahida Degdega Nidaamin lagu dhaqan geliyo Tariifada Dekedaha Iyadoo Loola Jeedo Iney Wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed Gaari Kartu Ujeeddadii aheyd isku Fillaan sho dhaqaale.

QODOBKA 2

BAABI'IN

Waxaa La Baabi'iyey wax alla wixii ah oo xeernid aamin aan la socon karin xeernidaamintan.

QODOBKA 3

DHAQAN GELIN

Xeernidaamintanu waxay dhaqan geleysaa lida Jeenaayi, 1983da, waxaana lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.

Waan aragnay ee Diiwaan gelinay;
Diiwaanka L. 1 bog L.1;
Muqdisho, 3 Jen. 1983.
Hantidhowraha Guud;
Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

WASIIRKA W. GAADIIDKA BADDA IYO DEKEDAHAA

(J/le Dr. Cabdisalaan Sh. Xuseen)

WASIIRKA W. CAADIIDKA & DEKEFAHA

MACNAHA TARIIFADA

MARAAKIIBTA IYO BADEECADDA

QODOBKA 1

GUUD AHAAN

Waxaa Lagu Caddaynayaan Tariifadan Khidmada-ha laga qaadayo maraakiibta iyo badeecadda marta Dekedaha Dalka ee muqdisho, berbera, Kismaayo, MarKa. Tariifadan oo lagu tusay tabeellayaal isku daba taxan habka xuruufta laatiinka waxaa la socda qodobbadii sharci ahaan loogu dhaqan gelin lahaa.

T A B E E L L A

- A & B — Hawlaha Xeebta iyo Doon ku dejinta
- C — Hawlaha Godka Markabka
- D — Dakhliga hawlaha Guud
- E — Marinka la qoday
- F — Qaadidda Xariga Markabka
- G — Ku Xirnaashaha Dekedda
- H — Hawlaha Biloodka
- I — Dakhiga Jiididda iyo Taagga
- J — Ijaarka Wiishaashka Rakiban
- K — Ijaarka Wiishashka Socda
- L — Ijaarka Forkliftka
- M — Ijaarka Tractor iyo Cawaadhida
(Trailers)
- N — Ijaarka Qalabka lagu dejito badeecada
- O — Ijaarka qalabka badda
- P — Ijaarka bakhaarrada
- Q — Hawlaha kala duwan (Miscellanea-
us Service)
- R — Saarista/Dejinta aadiidka socda
sida baabuurta, cagafyada iyo xii la fid ah.
- S — Dakhliga Doonyasha la Saaro
- T — Saliidda Dhuur aha Marta.

MICNAHA EREYO GAAR AH

Haddii aan si ~~hole~~ loo micney, ~~oyada~~ halkan ku qoran wuxaan loola jeedaa:

| | |
|--|---|
| « Tanka » | 1000 KG |
| « Nrt » | Culayska Saafiga ah ee Mar-kabka |
| « Grt » | Culayska guud ee Markabka |
| « Bakhaar » | Meelaha Dekedda ah ee badeecadda la dhigo ama ha ahaadeen meelo ban-naan kuwa gabbaad iyo dabool leh. |
| « Maalin » | 24 Saacadood oo ah 06.00 — 06.00 Subaxn-imو Inta Qoraxdu soo Jeeddo |
| « Saacad » | Inta Qoraxdu soo Jeedo |
| « So. Sh. » | Shillin Soomaali |
| « Dheerer Guud (Qal) | Dheererka |
| Markabka oo dhan | |
| « Al/Ta aan aan Nadiif. Ahayn » | Ti-mirta, Xoolaha Nool, Shamiintada, Daamurka. sal-iidda Iwm. |
| « Wiishka Dekadda» | Wiishashka |
| Dekedda ku rakiban ama ha ahaadeen Kuwwa re-yl dul socda ama Kuwa meel ku dhidban. | |
| « 150 » | Ururka Caalamiga ah oo qa-abilsan qiyaasta containerka. |

QAYBTA II

HAWLAHA XEEBTA

QODOBKA 1

SIDA LACAGTA LAGU QAADAYO

1. Dhammaan Lacagta Saarista iyo Dejinta Badeecadda waxaa lagu qaadayaa miisaan.
2. Dhamaan Khidmadaha Saarista iyo Dejinta oo uu miisaan gun u yahay waxaa lagu qaaday tan.
3. Qayb Kasta oo tan. ka mid ah waxaa loo qaadayaa tan. buuxa.
4. Haddii wararka ku qoran warqaddaha dad-ku wataan ay ku fillaan waayaan ama lagu Kals-oonaan waayo wakaaladdu waxay xaq u leedahay inay alaabta miisaanto ama cabbirto khidmaddana ku qaadato hadba kii badan.

QODOBKO 2 KONTAYNARKA MARAN

Kontaynarka Faaruqa ah waxaa wax loo ga sida ku cad tabbeellayaasha A & B ee Taariif-adan isaga oo la xisaabin badeecad oo kale.

QODOBKA 3

1. Alaabta aan nadiifta ahyn Dekeddana kaga tagta wasakh ama wax yeeshaa dhulka, dadka iyo badeecadda kale waxa laga qaadayaa 20% dheeraad ah ee Taariifada ku xusan Tabbeellaha (A & B) Wakaaladda Dekeduhu iyada awood u leh caddaynta alaabtii xeerkan geli karta ee laguma sheegi karo badeecad aan naddiif ahayn.
2. Alwaaaxdii ku timaada iyadoo aan isku xir-xirnayn oo kala daadsan waxaa laga qaadayaa 30% dulsaar ah ee tariifada ku cad tabbeellayaasha (A & B)

QODOBKA 4

CELIN IYO DHIMID TARIIFO

1. Haddii alwaaxda lagu keeno ama lagu raro iyadoo ah xircooyin aad la isugu hilay oon kala daasanayn, ayna fududayn karaan isticmaalka-qalabka sida Forklifts waxaa cidda leh loo celinayaa ama laga dhimayaa 5% Tariifada ku cad Tabbeellayaasha (A & B) ee Xeernidaamintan.
2. Haddii badeecadda, lagu soo dejiyo ama lagu dhoofiyoo iydoon ku rasaysan looxyada loo yaqaan «PALLETS» laguna shaqayn karo qalabka markiinadaha gaar « Forklifts waxaa cidda leh alaabta laga dhimayaa 3% ee Tariifada ku tilmaaman tabbeellayaasha (A & B) ka dib marka ay cidda lihi sidaas soo godsato. Haddii palletka lagu furfuro ama lagu raseeyo dekeda. wax lacag ah oo celinaayo ama la dhimavaa ma iiro

3. Badeecadda jawaannada ku jirta haddii la soo dejijo ama la raro iyadoo xirma ah oo markabka k u raacdo a m a k u keeno, cidda leh badeecadda waxaa laga dhimayaa 3% Tariifada ku tilmaaman tabbelleyshaasha (A & B) .
4. Badeecadda lagu raro ama lagu soo dejijo sanaadiiqda birta ah ee loo yaqaan « Containrs » oo waafaqsan cabirrada iyo hanaanka hay'adda « ISO » (International Organization For Standardization waxaa laga dhimayaa 4% Tariifada ku tilmaaman Tabbellayaasha (A & B) .
5. Haddii badeecad ku wada qoran hal xaashi shixnadeed (B L) dhammaantood 40% Tariifada ku qoran Tabbeelayaasha (A & B).

QAYBTA III

HAWLAHA MARKABKA DUSHIISA & KHANANKA

QODDOBKA 5

SALDHIGGA XISAABINTA

1. Dhammaan shaqada laga qabta markabka wax aalagu qaadayaa miissaan marka laga reebo xoolaha nool oo iyaga wax lagaga qaadayo neef ahaan.
2. Iyadoo la tixgelinayo hadbba heshiiska ka dhexeeya markabka iyo cidda alaabta leh lacagta loo yaqaan « Stevedoring » waxaa bixinaya markabka iyo wakiilkiisa, haddaanu wakiilkiisu keenin ogeysiis hormaris ah oo lagu caddaynayo cidda lagu leeyahay.
3. Shaqada Saacaddaha dheeraadka ah ee laga qabanayo markabka dushiisa waxaa la fulinayaa ka dib markii markabka ama wakiilkiisa laga helo codsi qoraal ah.

4. Shaqada Saacadaha dheeraadka ahi waxaa lagu xisaabtamayaa waqtiyada ah:

- (A) Maalin Caadi ah _____ 18. 00 — 06.00
(B) Jimce iyo ciidaha kale. — 06. 00 — 06.00

QAYBTA IV

HAWLAHA GUUD IYO HILINNADDA QODAN

QODOBKA 6

ISTICMAALKA

Lacagta hawlaha guud ahaaneed iyo marimmada qodan waxaa markab walba laga qaadayaa hal mar halkii safar dekeddii uu galaba.

QODOBKA 7

DHIMID

1. Maraakiibta ay leeyihiiin wakaaladda Gaa diidka Badda Soomaaliyeed ama laamaha **kale ee** Dawladda Soomaaliyeed cidii la wadaagin, waxaa **laga dhimaya 50%** lacagta ku tilmaaman tabbeellayaa sha (D & E).

2. Maraakiibta Dekedda u soo gasha sababaha ay ka mid yihiiin, hawadcoo ku xumaatay, caddilaad, qalaaqil shaqaale, g a r g a a r c a a f i m a a c iyagoon dejinayn ama qaadayn badeead **ama rakaab** waxaa laga qaadayaa **25%** Tariifada **ku xusan** Tabbeellayaasha (Q & E) ka dib markey joogaan 12 saacadood oo lacag la'aan ah.

3. Maraakiibta Dekedda u soo gasha sababaha ay ka mid yihiiin, soo caarsiin, kadib, safayn, **baaris** ama rinjiycyn, waxaa laga qaadayaa nus Tariifada ku taal tabbeel'eyaasha (D & E).

4. Maraakiibta Dekedda u soo gasha sababaha ay ka mid yihiiin qaadasho Shidaal, biyo cunno ama sahay kale iyagoon dejin ama qaadin badeec-ad ama rakaab waxaa laga qaadayaa **1/3** Hal sadd-ex dalool lacagta ku tilmaaman tabbeellayaasha (D & E).

QODOBKA 8

LACAG DHAAFID (EXCEPTIONS)

1. Maraakiibta marsada u timaadda iney dejiy-aan ama qaadaan rakaab ama boosto keliya iyag-oonDekedda ku soo xiran waxaa laga saamaxaya dhammaan lacagaha ku tilmaaman tabbeellayaasha (D & E) Laakiin haddii ay maraakiibtaasu yo Dekedda dibaddeeda waxaa laga qaadey aaTar-badeecad kale keenaan qaadaan oo lagaga shaqee-yo Dekedda dibaddeeda waxaa laga qaadayaa Tar-fada buuxda sida ku xusan tabbeellayaasha (D & E) .
2. Maraakiibta dagaalka dal kasta ha lahaadee waxaa laga dhaafayaa dhammaan lacagta ku tilm-aaman tabbeellayaasha (D & E) .

QAYBTA V

SOO XIRIDDA MARAAKIIBTA

QODOBKA 9

ISTICMAALKA

1. Lacagta Xiridda mareekiibta waxaa laga qa-adayaa markab kasta oo dekedda soo galaya ama ka baxaya ama dhaqdhaqaq ku sameynaya Deke-dda gudaheeda.
2. Baahida loo qado in la isticmaalo taashiilaa dka xirid ama ha ahaadeen dad ama qalab waxaa go'aankeeda leh hoggaanmiyahha (PILOT) mar kaas markabka soo gelinaya ama saaraya.

QODOBKA 10

DHIMID

Maraakiibta dhaqdhaqaqa ku samaynaysa dekeda gudaheeda waxaa laga qaadayaa nus $\frac{1}{2}$ tariif-ada ku tilmaaman tabbeellaha (F) .

QODOBKA 11

DHAAFID KHARAJ

Haddii Ujeeddada Xiridda, Furidda ama dhaqdhaaqa kale ee markabku samaynayaay ay tahay data Dekedda oo keliya ama ma jirto wax lacag ah oo laga qaadayo dhaqdhaqaan dartii.

QOYBTA VI

JOOGISTA DEKEDDA

QODOBKA 12

1. Lacagta Joogista waxaa laga qaadayaa markabka muddada uu ku xiran yahay dekedda.
2. Lacagta Joogista waxaa lagu xisaabinayaay dhererka guud ee markabka (Mitir) iyo maalma-ha uu joogo. qayb kasta oo ka mid ah hal mitir waxaa loo qaadanayaay mitir buuxa.

QODOBKA 13

DHAAFID KHARAJ

Maraakiibta dagaalka cid kasta ha lahaatee dek-edda u soo galaan ujeeddada ah booqasho gacaltoo-qaadasho shidaal, biyo iyo sahay kale ama gargaar caafimaad waxaa loo ogol iney dekedda ku xirnaa-daan lacag la'aan 24ka saacadood ee u horreeya joogistooda. haddii ay joogistoodu ka badato mudd-adaa kor ku tilmaaman waxaa laga qadi lacag buu-xda sida ku xusan tabbeellaha (G).

QAYBTA VII

HOGGAAMINTA MARAAKIIBTA

QOOBKA 14

ISTICMAALKA

Lacagta Hoggaaminta Maraakiibta waxaa laga qa-dayaa markii uu hoggaaamiyaha dekeddu (Pilot) u qabto shaqo ah soo gelin, saaris ama dhaqdhaqa-aqa kale ee dekedda gudaheeda ah.

QODOBKA 15

HOGGAAMIN KHASAB AH

Dhammaan Maraakiibta soo geleysa dekeddaha **Shisan** ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa khasab ku iney soo geliyaan/bixiyaan Hoggaamiyayaasha Dekedda markay geliyaan iyo markay baxayaanba.

QODOBKA 16

DHAAFID HOGGAAMIN KHASAB AH

Hoggaaminta Khasabka ah waxaa laga dhaafayaa:

(A) Maraakiibta Culayskoodu Saafiga ahi aanu ka badnayn 200 Ton.

(B) Dhammaan Markiibta Kalluumaysiga.

(C) Doonyaha yar yar.

(D) Maraakiibta dagaalka.

(E) Maraakiibta haysata shahaado ay bixisay Wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed oo lagaga Caifiyo hoggaaminta khasabka, taasoo aanu waqtigeedii dhicin.

QODOBKA 17

DHIMID

Maraakiibta dhaqdhaqaaq ku samaynasa dekeda **gudahaeeda**, wax aa laga qaadayaa nus ($\frac{1}{2}$) lacagata hoggaaminta ee ku tilmaaman tabeelaha H)

QODOBKA 18

XAYIRAD HOGGAAMI Y AHA

Haddii hoggaamiyaha la soo dalbado waqtii magacaaban oo lagu diyaariyo waqtigaas la magacaabay laakiin aanu markabku sababtiis darteed uga faadysan waayo waxaa loo oggol yahay nusa saac (30' daq iijo) oo lacag la'aan ah. wixii nusa saaccadaha ka dambeeyaa waxaa laga qaadayaa lacagta ku qoran tabbeelaha (Q) unsa saaca kasta qayb kasta ka mid ah 30 daqiijo loo xisaabinayaa nusa saaca dhann maamulka wakaaladda dekduhu wuxuu awood u leeyahay inuu lacagtaas saamaxo haddii ay yimadaan xaalado gaar oo la hubsado iney si allah u dhaceen ciddina aaney wax ka qaban karin.

QODOBKA 19

BAAHIDA DEKEDDA

Haddii marakabka meel looga dhaqaajiyo baahida dekedda lacagta hoggaaminta waa la saamaxayaa.

QAYBTA VIII

HAWSHA TAAGAGGA

QODOBKA 20

ISTICMAALKA TAAGAGGA

Maraakiibta Dekedda u soo galeysaa iney dejiyaan a m a q a a d a n b a d e e c a d b o o s t o a m a rakaab ama cunno iyo biyo ama gargaar caafim-aad. waxaa khasab ku ah iney isticmaalaan taaggga dekedda.

QODOBKA 21

DHAQDHAQAAQA DEKEDDA GUDAHEEDA

Maraakiibta dhaqdhaqaaq ku samaynaysa dekedda waxaa laga qaadayaa nus $\frac{1}{2}$ tariifada ku tilm-aaman tabbeellaha (I) .

QODOBKA 22

SAAMAXAAD

Maraakiibta hoos ku tilmaaman khasab kuma aha isticmaanlka taagagga dekeddu:—

- (a) Maraakiibta dagaalka ee soomaaliya.
- (b) Doonyaha yaryar
- (c) Maraakiibta kallumeysiga .
- (d) Qalabka lagu raaxaysto iyo huuriyada.
- (e) Maraakiibta culayska saafiga ahi aanu ka badnayn 200 ton.

QODOBKA 23

CAFIS LACAGEED

Maamulka Dekeddu wuxuu awood u leeyahay inuu ka saamax shaqada khasabka ah ee taagga haddii ay yimaadaan xaalado gaar markabkuna soo codsado.

QAYBTA IX

IJAAR WIISHASHKA IYO QALBKA KALE

BERRIGA

QODOBKA 24

WIISHASHKA RAKIBAN

Maraakiibta baddeecadda dejineysa ama qaadaysa ama qaadaysa waxaa khasab ƙu ah iney isticmaalaan wiishashka rakiban dekeddii leh.

QODOBKA 25

CAFIS ISTICMAAL WIISH

Maamulka dekeddu wuxuu awood u leeyahay inuu joojiyo isticmaalka wiishashkarakiban meeshii uu arko inaaney habboonayn ama ha ahaato xag dhaqaale ama xag farsama (Tusaale doonyaha). Maarkaas oo kale maamulka dekeddu wuxuu amri karaa in la isticmaalo wiishashka markabka ama kuwa dhulka hadba kii ku habboon.

QODOBKA 26

DEKEDDA DIBADEEDA

Lacagta wiish—a socda, forkliftska, cagafcagafyada iyo gaariyada lagu isticmaalo dekeda dibadeeda waxaa loogu xisaabtamay aamaalintii oo keliya muddada uu haysto qofka ama cidda isticmaalayaa. saacadaha habeenimo waxba laga qaadi maayo haddii aan la soo caddeyn in habeenimo lagu shaqaystay.

QAYBTA X

QALABKA BADDA

QODOBKA 27

QALABKA BADEECADDA LAGU HILO

Qalabka badeecadda lagu hilo markab Saarista iyo Dejinta sida baaletka, waayirrada, xargaha, silsiladaha iwm. waxaa ijaar ahaan loosiinayaa maraakiibta ka dib marka codsi qoraal ah laga helo markabka ama Wakiikiisa.

QAYBTa XI

QALABKA BADDA

QODOBKA 28

wixii ka baxsan halaha caadig ee Dekedaha, qalabka badda sida taaggaga motoorrada, doonya ha IWM. waxaa si gaar looga ijaari karaa ciddii doonaysa ama ha ahaato Dekedda gudaheeda ama dibadeeda, waxaana laga caadayaan lacagta ku tilmaaman Tabbeelaha (0).

2. Markii ay xaalado gaar la yimaadaan baahi gaar lacagaha ku qoran Tabbeelaha (0) waa la bedde li karaa iyadoo loo samaynayo heshiis gaar wa-xaana awooddeeda leh Maamulka Dekedda.

QAYBTA XII
IJAARKA BAKHAARRADA
QODOBKA 29
BADEECADDA SOO DEGTA

Badeecadda soo degta waxaa loo oggol yahay 5 (shan) beri oo ijaar la'aan ah iney Dekedda taal laga billaabo maalinta Markabku billaabo shaqada Dejinta.

QODOBKA 30

BADEECADDA DHOOFEYSA

Badeecadda dhoofeysa waxaa loo oggol yahay 5 (shan) beri oo ijaar la'aan ah marka laga billaabo maalintey soo gasho bakhaarka Dekedda.

QODOBKA 31

GOOBAHA BADEECADDDA LA DHIGO

Lacagta ijaarka bakhaarrada waxaa laga qaada-yaa badeecadda la dhigo bakhaarrada dadan iyo bar-xadaha bannaan; waxaana sharci ahaan loogu yeelanayaa ilaa marka Dekedda lagala baxayo ama la saarayo Markabka, ha ahaato mid la dhoofiyo ama mid dalka gudihiiisa geleysa.

QAYBTA XIII

BAABUURTA IYO QALABKA KALE SOCDA

QADOBKA 32

SHAQADA XEEBTA

Lacagta shaqada soo Dejinta ama Saarista ee Xeebta ee baabuurta, cagaf-cagafyada iwm. waxaa laga caadayaa tariifada ku tilmaaman Tabbeelaha (R).

QODOBKA 33

SHAQADA MARKABKA DUSHIISA

Lacagta hawlaha Markabka dushiisa ee baabuurta iyo qalabka kale ku tilmaaman Tabbeelaha (R) waxaa wax looga qaadayaa sida badeecadda guud ee ku qoran Tabbeelaha (C).

— 1 —

WAKAALADDA DEKEDAH A SOOMAALEY

TARIIFADA DDAKHЛИGA

TABBEELAHA "A"

SAARIS IYO DEJIN

MUQDISHO, BERBERA, KISMAAYO

B A D E E C A D D A

Shamiinto Jawaan ku jirta
Digo Xoolaad
Badeecadda Jaw. ku jirta
Hilib Gasaceysan
Muuska
Badeecadda Khatarta ah
Lugaha Baabuurta
Raadiyaha iyo Qalabkiisa
Tarraq
Fuustooyin Faaruq ah
Kabaha Ncc kasta
Caleen Shaah
Sigaar iyo Buuri

MIISAAN AMA

TIRADA

1000 KG.

»

»

»

Kartoon

1000 KG.

»

»

»

»

»

»

»

»

»

»

F A A H F A A H I N

SAARIS

Sh. So. 63/=

» 28/=

» 54/=

» 50/=

» 1/=

» 450/=

» 120/=

» 170/=

» 110/=

» 110/=

» 110/=

» 90/=

» 130/=

DEJIN

Sh. So. 63/=

» 28/=

» 56/=

» 50/=

» 1/=

500=/

» 140/=

» 200/=

» 120/=

» 170/=

» 100/=

» 320/=

» 150/

| | | | | | |
|------------------------------------|----------|---|-------|---|-------|
| Xaashiyaha Musquleha | > | > | 10/= | > | 12/= |
| Hargaha Ariga | > | > | 300/= | > | 320/= |
| Sponji Tuuqsama | > | > | 56/= | > | 72/= |
| Bundad cudbi ah | > | > | 80/= | > | 96/= |
| Alwaaxda | > | > | 155/= | > | 170/= |
| Qasacadaha Faaruq & Daboo/da | > | > | 30/= | > | 40/= |
| Tuubo Balastiik ah | > | > | 6/= | > | 6/= |
| Geel | N E E F | > | 4/= | > | 4/= |
| Lo' | N E E F | > | 1/= | > | 1/= |
| Adhi | N E E F | > | 68 | > | 70/= |
| Badeecadda Guud | 1000 KG. | > | 100/= | > | 120/= |
| Nacnac iwm. | > | > | 100/= | > | 120/= |
| Dek.Ber/ra waa ay ka duw/y Xoo'ha» | | | | | |
| Geel | N E E F | > | 10/= | > | 10/= |
| Lo' | N E E F | > | 7/= | > | 7/= |
| Adhi | N E E F | > | 2/= | > | 2/= |

QAYBTA XIV

SALIIDDA MARKABKA ISKA SHUBO

QODOBKA 34

DAKHLIGA HAWLAHA GUUD

Saliidda ceeriin iyo tan safaysan iyo wixii kalee la mid ah ee Markabka iska shubo ama soo nuugo waxaa laga aadayaa dakhliga hawlaha guud ee ku tilmaaman Tabbeelaha (T).

QODOBKA 35

SHIDAALKA MARAAKIIBTA

Saliidda ay Maraakiibtu shidaal ahaan u qaadato ee ay ka soo nuugaan goobaha dhulka waxaa wax looga qaadayaa sidá ku tilmaaman Tabbeellaha (T).

QAYBTA XV

DAKHLIGA KALA GEDISAN

QODOBKA 36

SAFAYNTA GODKA MARKABKA

Shaqaalahi Dekeddu waxay nadiifinayaan godka Markabka, ka dib marka Markabka ama Wakiilkiisa laga helo codsi qoraal ah waxaana laga qaadayaa lacagta ku qoran Tabbeellaha (Q).

QODOBKA 37

DIYAARINTA WIISHKA MARKABKA

Shaqaalahi Dekeddu waxay wiishashika Markabka u diyaariyaan hab shaqo ama hab safar dib markii Markabka ama Wakiilkiisa laga helo codsi qoraal ah waxaana laga qaadayaa lacagta ku tilmaaman Tabbeellaha (Q).

QODOBKA 28

FURIDDA IYO XIRIDDA GODKA MARKABKA

Shaqaalaha Dekeddu waxay furayaan ama xirayaa godka Markabka ka dib markii Markabka ama Wakiilkiisa laga helo codsi qoraal ah, waxaana laga gaadayaa lacagta ku qoran Tabbeellaha (Q).

QODOBKA 39

QAADKA CULUS

Lacagha shaqada badeecadda ee ku tilmaaman Tabbeellayaasha Tariifadan, waxaa dheer ooy dadka badeecadda lihi ka bixinayaan halkii qaad (Lift) ee ee gaadha ama ka badan 5 (shan) tan culays ahaan lacagta ku qoran Tabbeellaha (Q).

QODOBKA 40

RAKAAB

Lacagta Rakaabka ee ku qoran Tabbeellaha (Q) waxaa loola jeedaa hal qof iyo laba cuddadood oo ga-cadha lagu sido.

QODOBKA 41

EEDDA CADDHA LAGA SOO DEJIYO DOONYAHA

Kharajka badeecadda lagu Raro/Dejiyo Doonyaha ee Xeebta ama ha ahaato meesha shaqada lagu qabtaa Dekedda debeddeeda ama gudaheeda, waxaa laga qaa-di lacag 25% dheeraad ku ah qiimaha ku xusan Tariifada Wakaaladda shaxda (A & B).

— 3 —

WAKAALADDA DEKEDAH A SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLAHA «C»

HAWLAHA MARKABKA DUSHIISA

MUQDISHO BERBERA KISMAAYO MARKA

B A D E E C A D D A

MIISAAN

| | AMA TIRO | Sh.So. | Sh.So. | Sh.So. | Sh.So. |
|-----------------------|----------|--------|--------|--------|--------|
| Sharmanto | 1000 KG. | 35/= | 35/= | 35/= | — |
| Badeecadda Jawaannada | » | 35/= | 35/= | 35/= | — |
| Badeecadda Guud | » | 35/= | 35/= | 35/= | — |
| Alaabta Khatarta ah | » | 40/= | 40/= | 40/= | — |
| Hilib Qasacadeysan | » | 35/= | 35/= | 35/= | — |
| Geela | NEEF | 8/= | 10/= | 8/= | — |
| Lo'da | NEEF | 6/= | 7/= | 6/= | — |
| Ariga | NEEF | 1.50 | 1.50 | 1.50 | — |

WAKAALADDA DEKED AHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLAHA «K»

IJAARKA WIISHASHKA SOCDA

| SHAQO | SADHIGGA DAKHLIGA | Q A A D K A | W I I S H A S H K A | |
|----------|-------------------|-------------|---------------------|------------------------|
| | | ILAA | ILAA | ILAA KA BADAN |
| | | 5000kg. | 5001-15000kg. | 1500-25000kg. 25000kg. |
| GUDAH | TANKII | 60/= | 100/= | 150/= 1000/= |
| DIBADDAA | SAACADDII | 250/= | 400/= | 500/= 2000/= |

WAKAALADDA DEKEDAHA SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLAHA «R»

GAADIIDKA IYO QALÄBKA KALE EE SOCDA

Miišaan ama ilaa iyö ilaa iyo ilaa iyo ilaa iyo ilaa iyo ilaa yo

ABOVE

| | | | | | | |
|------------|--------|---------|-------------|---------------|--------------|---------|
| Faahfaahin | Tiro | 600 kg. | 601-1000kg. | 1001-15000kg. | 1501-2000kg. | 2000kg. |
| CARS | PER NO | 400/= | 600/= | 1000/= | 15000/= | 2400/= |
| LORRY | » | 400/= | 600/= | 1000/= | 15000/= | 2400/= |
| TRACTORS | » | 400/= | 600/= | 1000/= | 15000/= | 2400/= |
| GAGAFYO | » | 400/= | 600/= | 1000/= | 15000/= | 2400/= |
| CRANES | » | 400/= | 600/= | 1000/= | 15000/= | 2400/= |
| BULDOOSERS | » | 400/= | 600/= | 1000/= | 15000/= | 2400/= |

- 1 -

WAKAALADDA DEKEDAHAD SOOMAALIYEED
TARIIFADA DAKHLIGA

TABELLA «Q»

HAWLAHA KALA DUWAN

| F A A H F A A H I N | SALDHIGGA DAKHLIGA | K H I D MAALIN CAADI AH | M A D D JIMCE | A H A CHIDDAHA KALE |
|-------------------------------|-----------------------|-------------------------------|------------------|---------------------------|
| Biyaha Maraakiibta la siiyo | Tankii | 15/= | 15/= | 15/= |
| Kala wareejinta Badeeco | | | | |
| Markabka Dushiisa | Tankii | 20/= | 20/= | 20/= |
| Miisaanka Dekedda | Hal shay | 20/= | 20/= | 20/= |
| Shaqo Dheer.ah,Saar./Deji.Bad | Khi/ha Tab.C | 25/= | 50/= | 100/= |
| Dib u cabbeyn Badeeco | 1000 kg. | 5/= | 5/= | 5/= |
| Bad/cda Deked.ka baxda galab | Baabuur | 40/= | 40/= | 40/= |
| Bad/eda Deked.ka baxda galab | gaari dameer | 10/= | 10/= | 10/= |
| Nadiifin Godka Markabka | God/Saacad | 1000/= | 1200/= | 1500/= |
| Diyaarinta Godka Markabka | Wiish/Saae. | 400/= | 500/= | 600/= |
| Xayiraad Bilate | Nus Saace | 150/= | 200/= | 300/= |

— 7 —

| | | | | |
|----------------------------|-----------------------------|-------|-------|-------|
| Xirid/Furid/Godka Markabka | God/Saacad | 400/= | 500/= | 600/= |
| Qaadka Culus | Hal Qaad oo gaara ama ka | | | |
| | Badan 5 Ton. | 30/= | 30/= | 30/= |
| Cabbayn Kontainarka | Halkii | 500/= | 600/= | 800/= |
| Faaruq Kontaynar | Halkii | 200/= | 300/= | 400/= |
| Rakaabka | Qofkii | 18/= | 18/= | 10/= |
| Sahay Siinta | 1000 kg. | 5/50 | 5/50 | 5/50 |
| Alaabta Rakaabka | 1 Cuddo | 10/= | 10/= | 10/= |
| Boosta | 1 Cuddo | 10/= | 10/= | 10/= |

— 8 —

TARIIFADA DAKHLIGA
SOOMAALIYEED
TABBEELLE «F»

KU XIRASHADA DEKEDDA

| CULAYSKA | SALDHIGGA | MUQDISHO | BERBERA | KISMAAYO | MARKA |
|--------------------|---------------|----------|---------|----------|--------|
| MARKABKA | DAKHLIGA | So.Sh. | So.sh. | So.Sh. | So.sh. |
| 1-2000 NRT | MARKAB/MARKII | 400/= | 400/= | 400/= | — |
| 20001-4000 NRT | » | 600/= | 600/= | 600/= | — |
| 40001-6000 NRT | » | 800/= | 800/= | 800/= | — |
| 6001-8000 NRT | » | 1000/= | 1000/= | 1000/= | — |
| 8001-10000 NRT | » | 1200/= | 1200/= | 1200/= | — |
| Ka badan 10000 NRT | » | 1400/= | 1400/ = | =1400/= | — |

WAKAALADDA DEKEDAHA
SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA
TABBEELLAHA «G»

MUDDADDA MARKABK UDEKEDDA KU XIRAN YAHAY

| FAAHFAAHIN | SALDHIGGA | DAKHLIGA | So.Sh. | So.sh. | So.Sh. | So.sh. | — |
|------------|--------------|----------|--------|--------|--------|--------|---|
| MARKAF | MAALIN/METER | 25/= | 25/= | 25/= | 25/= | — | |

— 10 —

WAKAALADDA DEKEDAHA

SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLAHA «H»

HOGGAAMINTA MARAAKIIBTA

| CULAYSKA MARKABKA | SALDHIGGA DAKHLIGA | MUQDISHO | BERBERA | KISMAAYO | MARKA |
|----------------------|-----------------------|----------|---------|----------|--------|
| 1-2000 GRT | GRT/OPE/N | So.Sh. | So.sh. | So.Sh. | So.sh. |
| 20001-4000 GRT | » | 0.20 | 0.20 | 0.20 | — |
| 4001-6000 GRT | » | 0.40 | 0.40 | 0.40 | — |
| 6001-8000 GRT | » | 0.50 | 0.50 | 0.50 | — |
| 8001-100000 GRT | » | 0.60 | 0.60 | 0.60 | — |
| KA BADAN 10000 GRT | » | 0.70 | 0.70 | 0.70 | — |
| | » | 0.80 | 0.80 | 0.80 | — |

WAKAALADDA DEKEDAHA

SOOMAALIYEED

TARIIFADA DAKHLIGA

TABBEELLAHA «I»

KHARAJKA TAGAGGA

| CULAYSKA MARKABKA 112000 NRT | SALDHIGGA DAKHLIGA Markab/Markiiba | MUQDISHO BERBERA KISMAAYO MARK So.Sh. | So.sh. | So.Sh. | So.sh. |
|------------------------------------|--|--|--------|--------|--------|
| 2001-4000 | » » | 2000/= | 2000/= | 2000/= | — |
| 4001-6000 | » » | 2500/= | 2500/= | 2500/= | — |
| 6001-8000 | » » | 3000/= | 3000/= | 3000/= | — |
| 8001-10000 | » » | 3500/= | 3500/= | 3500/= | — |
| Ka badan 10000 | » » | 4000/= | 4000/= | 4000/= | — |
| Guul Victory | SAACADDII | 4500/= | 4500/= | 4500/= | — |
| | | 3500/= | — | — | — |

— 12 —

WAKAALADDA DEKEDAHA
SOOMAALIYEED
TARIIFADA DAKHLIGA
TABBEELLAHA «J»
IJAARKA WISHASHKA RAKIBAN

| QAADKA | SALDHIGGA | MUQDISHO | BERBERA | KISMAAYO | MARKA |
|--------------------|-----------|----------|---------|----------|--------|
| WIISHKA | DAKHLIGA | So.Sh. | So.sh. | So.Sh. | So.sh. |
| 1-3000 TONS | SAACADDII | 300/= | 300/= | 300/= | — |
| 3000-5009 TONS | » | 350/= | 350/= | 350/= | — |
| 5001-1000 TONS | » | 400/= | 400/= | 400/= | — |
| 10001-1500 TONS | » | 500/= | 500/= | 500/= | — |
| KA BADAN 1500 TONS | » | 800/= | 800/= | 800/= | — |
| JUMBO | » | 1500/= | 1500/= | 1500/= | — |

— 13 —

WAKAALADDA DEKEDAHA
SOOMAALIYEED
TARIIFADA DAKHLIGA
TABBEELLAHA «L»
IJAARKA FORKLIFTKA

GOOBTA
SHAQADA
Gudaha Dekedda
Dibadda Dekedda

| | | |
|-------------|-------------|---------------------|
| SALDHIGGA | Q A A D K A | F O R K L I F T K A |
| DAKHLIGA | | |
| Halkii Tan | SH. SO. | 50/= |
| Halkii Saac | SH. SO. | 180/= |

WAKAALADDA DEKEDAHA

SOOMAALIYEED

TARIIFAD ADAKHLIGA

TABBEELLAHA «M»

IJAARKA CAGAFTA IYO GAARIYADA

GOOBTA SALDHIGGA
SHAQADA DAKHLIGA
Dekedda Dibedda Saacaddii
Tractor Goosnic Etc.

CAGAFTA

100/=
300/=

1-20 TONS

400/=
—

G A A R I Y A D A

KA BADAN 20 TONS

600/=
—

— 14 —

WAKAALADDA DEKEDAHA
SOOMAALIYEED
TARIIFAD ADAKHLIGA
TABBEELLAHA «N»
IJAARKA QALABKA SAARISTA IYO
DEJI/TA BADEE/DA

QALABKA
Xarig Shabaq ah
Xarig Caadi ah
Waayirka
Baalet
Silsilado

SALDHIGGA DAKHLIGA
Maalintii/Shabaq
» »/Xarig
» »/Waayir
» »/Baalet
» »/Silsilado

| K H I D M A D D A |
|-------------------|
| 60/= |
| 70/= |
| 83/= |
| 10/= |
| 40/= |

— 15 —

WAKAALADDA DEKEDAHA
SOOMAALIYEED

TARIIFAD ADAKHLIGA
TABBEELLAHA «O»
IJAARKA QALABKA BADDA

| NOOCA QALABKA | SALDHIGGA DAKHLIGA | GUDAHA | DEKEDDA DIBADDEEDA SHAQO CAADI AH | GURMADKA MARAAKIIBTA |
|------------------|-----------------------|--------|--------------------------------------|-------------------------|
| Taagagga | Saacaddii | 2500/= | 3000/= | 4500/= |
| Motorada | » | 250/= | — | — |
| Doonyaha | Maalin | 500/= | 1000/= | — |

**WAKAALADDA DEKEDAHA
SOOMAALIYEED
TARIIFADA DAKHLIGA**

MAALMAHA

10ka Beri ee u horraysa
10ka Beri ee labaad
Wixii ka dambeeyaa

| IJAARKA BAKHAARRADA | F A A H F A A H I N | GUDAHADAKHLIGA | BARXADAHABANNAAN | BAKHAARRADA |
|---------------------|---------------------|----------------|------------------|-------------|
| Maalintii/100kg. | 0.30 | | | 0.50 |
| » | 0.60 | | | 1/= |
| » | 1/= | | | 1/50 |

— 17 —

WAKAALADDA DEKEDAHA
SOOMAALIYEED
TARIIFADA DAKHLIGA
TABBEELLAHA «Q»
HAWLAHA QALA DUWAN

| FAAHFAAHIN | SALDHIGGA DAKHLIGA | K H I D MAALIN CAADI AH | M A D D A H A JIMCE | CIEDAHA KALE |
|--------------------------------|-----------------------|-------------------------------|------------------------|-----------------|
| Biyaha Maraakiibta la siiyo | Tankii | 15/= | 15/= | 15/= |
| Kala wareejin badeeco Markabka | | | | |
| Dushiisa | Tankii | 20/= | 20/= | 20/= |
| Miisaanka Dekedda | Hal shay | 20/= | 20/= | 20/= |
| Shaqo dheer. ah, Saar. dej. | | | | |
| Badeeco | Khj/ha Tab.«C» | 25/= | 50/= | 100/= |
| Dib u cabbayn badeecadda | 1000 kg. | 5/= | 5/= | 5/= |
| Badeecadda Dekedda ka baxda | | | | |
| Galabtii | Baabuur | 10/= | 12/= | 15/= |
| Badeecadda Dek.ka baxda Galab. | G/ Dameer | 3/= | 5/= | 7/= |
| Nadiifin godka Markabka | God/Saacad | 1000/= | 1200/= | 1500/= |

| | | | | |
|------------------------------|---|-------|-------|-------|
| Diyaarin Wiishashka Markabka | Wiish/Saac. | 400/= | 500/= | 600/= |
| Xayiraad Biloote | Nus Saace | 150/= | 200/= | 300/= |
| Xirid/furid/godka Markabka | God/Saacad | 400/= | 500/= | 600/= |
| Qaadka culus | Hal qaad oo gaara ama ka badan 5 Ton. | 30/= | 30/= | 30/= |
| Cabbaynta Kontaynarka | Halkii | 500/= | 600/= | 800/= |
| Faaruq | Konttaynar | 200/= | 300/= | 400/= |
| Rakaabka | Qofk | 18/= | 18/= | 10/= |
| Sahay siinta | 1000 kg. | 5/50 | 5/50 | 5/50 |
| Alaabta Rakaabka | 1 Cuudo | 10/= | 10/= | 10/= |
| Boosta | 1 Cuudo | 10/= | 10/= | 10/= |

— 19 —

WAKAALADDA DEKEDAHA
SOOMAALIYEED
TARIIFADA DAKHLIGA
TABBEELLAHA «S»
KHHARAJKA DOONYAHA

FAAHFAAHIN

SALDHIGGA

DAKHLIGA MUQDISHO BERBERA KISMAALO MARKA

Hawlaha guud ahaaneed

Doon/Safar 600/= 600/= 600/= 600/=

WAKAALADDA DEKEDAH
SOOMAALIYEED
TARIIFADA DAKHLIGA
TABBEELLAHA «T»

HAWLAHA GUUD AHAANEED
SALIID IYO BATROOLKA

| SALIID IWM. | SALDHIGGA DAKHLIGA | MUQDISHO | BERBERA | KISMAALO | MARKA |
|-------------|-----------------------|----------|---------|----------|-------|
| SAARIS | 100 kg. | 0.30 | 0.30 | 0.30 | — |
| DEJIN | 100 kg. | 0.50 | 0.50 | 0.50 | — |
| MOLASESS | SALDHIGGA DAKHLIGA | MUQDISHO | BERBERA | KISMAALO | MARKA |
| SAARIS | — | — | — | 0.70 | — |
| DEJIN | — | — | — | 0.70 | — |

